Talo wanaagsan oo laga bixinayo ka hortagga dabka guryaha

Saddex ka mid ah afartii dab waxay ka dhex dhacaan guryaha waxayna badanaa ka dhashaan dayacaad ama cillado xagga farsamada ah. Xusuusnow in in laga hortago dabka ay ka fududdahay in la demiyo.

Cilladaha korontada

Waxaa jira noocyo kala duwan oo qalab koronto ah oo guryaheenna yaalla isla markaana qalabyadaan waxay sababi karaan dab haddii uu kulkoodu xad dhaaf noqdo ama si aan sax ahayn loo isticmaalo. Haddii aad ogaatid wax ur ah oo laga shakiyo ama aad dhawaaq ka maqashid rugta korontadu ku rakiban tahay markaas la xiriir nin koronto yaqaan ah. Mar kasta waxaa ugu wanaagsan in qof aqoon u leh korontada uu dayactiro xarkaha iyo qalabka korontada. Dabka korontada ka kaca waxaa sidoo kale looga hortagi karaa iyadoo la raacayo tallaabooyin joogto ah. Mar kasta TV-ga ka demi meesha laga shido, ha ka tegin makiinadda dharka qallajisa, makiinadaha dharka lagu dhaqo iyo kuwa maacuunta dhaqaba iyagoo shidan marka aad guriga ka tegeyso ama seexaneyso. Marna dharka ha ku qallajin raadiyatooreyaasha ama kululeeyeyaasha qolka suwaanada. Dabeecad ka dhigo in aad korontada ka saarto makiinadda rootiga lagu kululeeyo (toasters) iyo feerada ama kaawiyadaha. Guriga ku rakibo qalabka meesha korontada laga xukumo demiya (residual current circuit breaker).

Shumacyada iyo dabka furan

Hilmaamidda in la demiyo shumacyada waxay sababtaa dab fara badan oo ka kaca guryaheenna. Shumacyada ha ag dhigin daahyada ama telefishanka. Isticmaal ulaha shumaca ee ka sameysan waxyaabaha aan guban sida seraamigga, dhalada ama qasaca. Ha isticmaalin ulo shumacyo oo alwaax ah. Dabeecad ka dhigo in aadan qolna ka tegin adigoo aan shumaca ka demin.

Carruurtu waxay mar walba xiiseeyaan dabka sidaa awgeed waa muhiim in ay bartaan sida loola mucaamalo dabka. Marna canug dab ha ku cabsi gelin – waxay u sii kordhineysaa oo keliya in ay u sii kuurgalaan. Marna canug ha uga tegin keligii shumac shidan ama dab furan oo baxaya.

Sigaar cabidda

Sigaar cabiddu waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu badan ee dabka sababa oo weliba halista ugu daran ay ka soo baxdo. Ma aha sariir sigaar ku dul cabidda oo keliya waxa sigaar cabidda halista ka dhiga; ee waxaa halisteeda leh in la hurdo iyadoo sigaar kursi ama salooto lagu dul cabbayo. Qoy waxa ku jira weelka sigaar lagu demiyo ka hor inta aadan ka daadin.

Jikadu waxay noqon kartaa halis dab

Dab fara badan ayaa ka billowda cunto kariyaha. Cunto karinta aan wax biyo iyo saliid ah lagu darin ayaa ah waxa ugu badan ee sababa dabka. Dufanka iyo saliidda ayaa gubta marka heerkulku uu sare u kaco, iyo sidoo kale xaydhta shumaca. Marna cunto kariyaha ha uga tegin wax karkaraya oo aan lala joogin. Korjoogidda cunto kariyaha ootomaatigga ah waa hab wanaagsan oo looga fogaanayo dabka ka billowda cunto kariyaha – waxaad wax badan oo arrinkan ku saabsan ka akhrisan kartaa www.brandsakerthem.se.

In aad marwaxadda qiiqa jikada ka saarta mar walba sida suuragalka ah nadiif uga dhigto waxay gacan ka

geysan kartaa hoos u dhigidda halista dabka jikada ka kaca maadaama dufanka iyo madowga qiiqu ay si aad u fudud u gubtaan.

Waxyaabaha guban kara

Batroolka, aalkolooyinka ay ku jiraan methyl, paraffin iyo dareerrada dabka ifiya dhammaantood aad ayey kuwo guban kara u yihiin. Dareerradaan ku xafid weelal ku habboon iyo meel aysan carruurtu gaari karin.

Shid hilibka dibedda lagu dubo adigoo isticmaalaya dareerka dabka ifiya. Marna ha isticmaalin batrool ama aalkolooyin ay ku jiraan methyl.

Marna qalabka walxaha sida gaaska laga buufiyo ha ku tuurin dab meel furan ku shidan maadaama ay taasi keeneyso qarax weyn.

Gaaska dhalooyinka ku jira si sarreysa ayuu u guban karaa sidaa awgeed waa muhiim in si sax ah loo isticmaalo. Demi haniyaha ama falfaha marka aad dhammeysato isticmaalka gaaska dhalooyinka ku jira. Haddii aad gaas dhalo ku jira ku isticmaashay doon ama gaadiid kale korkooda markaas waa muhiim in aad si joogto ah u hubiso isku xiryada, haniyeyaasha iyo dhuumaha si aad u xaqiijiso in aysan waxba ka hallaabin. Wax badan oo ku saabsan isticmaalka gaaska dhalooyinka ku jira ee gaadiidka lagu dul isticmaalayo ka akhriso warqadda qoran ee talada wanaagsan ee Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ka.

Dab meel qabadsiin

Xaafadaha la deggan yahay ayaa badanaa bartilmaameed u ah weerarrada dab qabadsiinta. Habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo kuwaan waa in aan waxyaabaha guban kara lagu kaydin jaranjarooyinka ama meelaha kale ee sida fudud loo gaari karo. Sidoo kale waa muhiim in la xiro qolka yar ee meesha ugu sarreysa guriga ku yaal, qolalka dhulka hoostiisa iyo garaashyada iyo in la xaqiijiyo in nalalku shaqeynayaan. Tallaabooyinkaan ayaa kuwa dabka qabadsiiya ku adkeynaya in ay dab qabadsiiyaan meesha.

In lagu caawiyo ayaa loogu talogalay

Qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa

Marka uu dab kaco waa qiiqa kan ugu khatarsan ee dhimashada keena. Qaylo dhaamiye qiiq wuxuu fal celin ka bixiyaa qiiqa halista ah wuuna ku kicinayaa. Si joogto ah u hubi qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa. Wax badan oo ku saabsan qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa ee guriga ka akhriso warqadda qoran ee talada wanaagsan ee Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ka.

Dab damiyaha gacanta lagu qabsado

Dab damiyaha gacanta lagu qabsado waa aalad wanaagsan oo loogu talogalay billaabidda dab deminta. Qof kasta oo qoyska ka tirsan waa in uu yaqaanaa sida dab damiyuhu u shaqeeyo iyo meesha uu yaallo. Waxaad wax badan oo ku saabsan doorashada dab damiyaha saxda ah ka akhrisan kartaa warqadda qoran ee talada wanaagsan ee Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ka.

Qorshaha daad gureynta

Adiga iyo carruurtaadu sameysta qorshe daad gureyn. Haddii ay suuragal tahay xaqiiji in aad haysataan ugu yaraan labo meelood oo si degdeg ah uu qof kasta oo qoyska ka tirsan uga baxo. Xaqiiji in aad dibedda uga bixi kartaan haddii uu qolalkiina dab qabsado. Iridda hoos ha ka xirin adigoo isticmaalaya qufulka meesha loogu talogalay sii dhex gala (mortise lock). Qorshaha daad gureynta dhig meel uu qof kasta ka arki karo islana go'aansada meel aad ku kulantaan oo dhismaha ka baxsan. Daad gureynta ku fududeyso adigoo guriga ku rakibanaya tusaale ahaan jaranjarada daad gureynta.

Gurigaagu ammaan ma yahay?

- Waxyaabaha guban kara ka fogee cunto kariyaha.
- Makiinadda qaxwada lagu sameysto iyo makiinadda rootiga lagu kuleysto korontada ka saar marka aan la isticmaaleyn. Gooreyso ama waqti xisaabiye ku rakibo.
- Xaqiiji in nalalku ay yihiin watt-kii saxda ahaa iyo xarkaha korontada dhereeya aysan isku milganeyn.
- Beddel meelaha korontada/bareesooyinka cilladeysan isla markaana kuwooda dabacsan dhuuji.
- Ha ku dayin tuwaallada ama walxaha kale ee ka sameysan waxyaabaha guban kara raadiyetooreyaasha.
- Demi shumacyada markaad qolka ka tageyso.
- Haddii fuyuusyo ay qarxaan markaas koronto yaqaanka weydiiso in uu cilladda raadiyo
- Bareesada ka saar xarkaha korontada iyo kuwa telefishanka marka uu gugac jiro.
- Xaqiiji in ay TV-ga agtiisa ay hawo badan ka jirto.
- TV-ga ka qaad dharka, shumacyada iyo wixii kale ee dab keeni kara.
- Xaqiiji in marwaxadda hawada ka saarta jikada ay nadiif tahay.
- Ma leedahay qaylo dhaamiyeyaal qiiq xaggeyse kuugu yaallaan?
- Guriga ma kuu yaallaa dab damiye gacanta lagu qaadan karo?
- Fakuum garee tallaajada gadaasheeda iyo/ama qaboojiyaha.
- Xaqiiji in ulaha shumacyada aan la ag dhigin daahyada ama wax la mid ah iyo in aysan lahayn qurxin guban karta.
- Guriga ku rakibo qalabka meesha korontada laga xukumo demiya (residual current circuit breaker).

MAR KASTA WAC 112 HADDII UU DAB KU QABSADO

Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ku waa xubin ururro badan oo ka shaqeeya in ay Sweden ka dhigaan meel ammaaan ah. Iyadoo loo marayo macluumaad bixin iyo tababar ayaan dadka, shirkadaha iyo ururrada ka caawinnaa iyo mas'uuliyad iska saaraan ka hortagga dabka. 08-588 474 00. www.brandskyddsforeningen.se

165150/200

Brandskyddsföreningen